# Tularemia

Public Health
Seattle & King County

**Waa maxay?** Tularemia waxa ay noqon kartaa jirro halis ah oo ay sababto bakteeriya. Waxay ku dul nooshahay cayayaanka iyo xayawaanada, sida bakaylaha iyo jiirka. Calaamadaha tularemia waxay bilaaban karaan 1-14 maalmood ka dib u bayla noqoshada cudurka. Astaamaha qaar ee cudurka waa:

- Qandho lama filaan ah iyo qarqaryo
- Madax xanuun
- Boogo
- Daciifnimo
- Xanuunka murqaha iyo kala-goysyada jirka

## Sidee ayuu cudurka ku faafaa?

- Qaniinyada cayayaanka shilinta ama tuqsiga
- Taabashada xayawaanada jirran ama dhintay
- Cunista ama cabbista cunto ama biyo wasakhaysan
- Neefsashada bakteeriyada

## Sideen isaga ilaalin karaa in aan qaado cudurka?

- Isticmaal galoofis marka aad taabanayso xoolaha
- Cuntada u kari si fiican
- Dhaq gacmahaaga, gaar ahaan kadib markaad taabato xayawaanka
- Ha salsalaaxin xayawaanada dhintay
- Xaqiiji in biyaha ay nadiif yihiin
- Isticmaal daawada cayayaanka la isaga celiyo ee EPA ay ansixisay si aad ugu isticmaasho maqaarka

*Daawooyinka cayayaanka la isaga celiyo ee EPA ay ansixisay ee loo isticmaalo maqaarka waxaa ka mid ah DEET, IR3535, picaridin, iyo saliidda liinta eucalyptus (OLE). Dharka u isticmaal permethrin.

## Ogaanshaha cudurka iyo daaweynta

La hadal dhakhtarkaaga haddii aad u malaynayso inaad qabto tularemia. Dadka qaba tularemia waa in lagu daaweeyaa daawo sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Cudurkaan wuxuu noqon karaa mid dilaa ah haddii aan la daaweyn.

Si aad wax badan uga ogaato booqo **www.kingcounty.gov/cd**

Somali
6/12/2024